



SHURUUDAHA XUBINIMADDA

1. Waxaa Ururka Xubin Ka Noqon Kara Ruux Kasta Oo Soomaali Ah, Da'diisuna Gaartay (18) Sano Jir Oo Ku Qanca Mabaadii'dda, Ujeedooyinka, Siyaasadaha Iyo Barnaamijka Ururka, Haddii Aanu Jirin Qodob Sharci Ah Oo Ka Horjoogsanaya In Ay Ururka Ku Biiraan.
2. Qofka Xubin Ka Noqonaya Ururka Waa Inuu Ballanqaadaa In Uu Dhawrayo, Kuna Shaqaynayo Mabaadi'da, Ujeedooyinka, Siyaasadaha Iyo Barnaamijka Ururka.
3. Waa inuu la Yimaadaa Hal Sawir Oo Teesaro ah.
4. Dhigta Ama Dhameeyay Dugsi sare, iyo wixii ka sareeya.

NUUCYADDA XUBINNIMADDA

Xubinnimadu Ururka Waxa Ay U Qaybsan Tahay Laba Nooc:

1. XUBIN GUUD.

Waxaa la siiyaa ruxii URURKA taageera laakiin aan isa saarin mas'uuliyaadka Ururka (sida bixinta qaaraanka rasmiga ah, kasoo qaybgalka Howlaha , iyo tarabaradda)

2. XUBIN RASMI AH.

b) Waxaa la siiyaa ruuxii ka qaybgalaya hawlaha Ururka si dhameystiran , Isagoon Aysan Saarnayn Waajibaadka Xubnaha Rasmiga Ah.

t) Xubinta Rasmiga ah waxey isku bedelaysaa Xubin aan Rasmi Ahayn, haddii ruuxu fulin waayo waajibaadka xubnaha Rasmiga ah.

j) Xubinta Aan Rasmiga Ahayni , waxey isku debelaysaa xubin Rasmi ah haddii ruuxu go'aansado inuu la yimaado waajibaadka xubinimada Rasmiga ah.

x) Isbedelka xubnimada wuxuu dhici karaa hal mar lix bil kasta marka la qiimeeyo hawlaha Xubnaha Ururka.

XUQUUQDA XUBNAHA RASMIGA AH EE URURKA

Xubinta Rasmiga Ah ee URURKA waxa ay xaq u leedahay:

1. In lagu wargeliyo Barnaamijyada iyo waxqabadka Ururka
2. In ay ka qayb gasho si toos ah ama si dadban dhammaan hawlaha Ururka.
3. In laga abaal mariyo waxqabadka iyo guulaha ay Ururka u soo hoyso.
4. In la dhegaysto, soona gudbiyo fikrado iyo hindisayaal Wax Ku Biirib Kara Habsami-u-socodka Howlaha Ururka.
5. In laga ilaaliyo Ururka dhexdiisa wax kasta oo sharaftiisa dhaawacaya
6. Qaadashada aqoonsiga xubinnimada.
7. faa`iidaysiga barnaamijyada tababarada lagu tayaynayo awoodda iyo kartida xubnaha.
8. Ka Mid Noqoshada Golaha Fulinta Iyo Xaafiisyada Hoos Yimaadda.

WAAJIBAADKA XUBNAHA RASMIGA AH EE URURKA

Waxaa saaran xubnaha Rasmiga Ah waajibaadkan soo socda:

1. Dhowrista Axdiga aasaasidda, xeer hoosaadka iyo siyaasadaha Ururka.
2. Taageeridda Iyo ku shaqaynta bayaanada ka soobaxa URURKA.
3. In ay Ixtiraamto xubnaha kale ee URURKA.
4. In ay ilaaliso xogta, siraha, hantida iyo sumcada Ururka kana difaacdo dicaayadaha.
5. In ay si firfircoon uga qayb qaadato Howlaha URURKA.
6. in ay ka dheeraado wax kasta oo ummadda kala fogeyn kara
Sida qabyaaladda , Gobolaysiga, Dagaalada, Daroogada IWM
7. In ay bixiyo qaaraanka Ururka, Si Waafaqsan Xeer-Hoosaadka.
8. Inuu soo bandhigo wixii tabasha ah Ururka gudihiisa laakiin ayna banaanayn inuu banaanka usaaro.

WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA XUBNAHA GUUD EE URURKA.

1. Ka Qaybgelidda Shirarka Guud Ee Ururka.
2. Ka Qaybgelidda Tababaradda iyo Barnaamijyadda Wacyigalinta.
3. Qaadashada Aqoonsiga Xubnaha Guud.

CODSIGA XUBINNIMADA

1. Si qofku uu xubin uga noqdo Ururka waa inuu codsi xubinnimo (Membership Application) u soo gudbiyaa Xaafiiska Xog-Haynta Ururka.
2. Wuxuu Codsaduhu Buuxinayaa Foomka Xubinnimadda Ururka.
3. Kadib Codsiga, Waxaa Eegaya Oo Ansixinaya Golaha Dhexe Ee Ururka.
4. Xubinnimada waxaa lagu keedinayaa xafiisyada Xoghayaha Ururka.
5. Xubin kasta waa inuu qaataa Number muujinaaya Xubinnimadiisa oo laga rabo inuu ku hawlgalo.

WAAYIDDA XUBINNIMADA RASMIGA AH.

Xubinnimada Ururka waxaa lagu waayi karaa arimahan soo socda:

1. Haddii qofku iskii iskaga casilo xubinnimada Ururka Xubintu istigaa dhiibto; Golaha Dhexe Ka Ogolaado ;
2. Xubintu geeriyooto ama uu ku yimaado xanuun suurto gelin waaya gudashada Xilkiisa/xilkeeda; Muddo Ku Siman sanad
3. Haddii lacadeeyo inuu ka horyimi xeerka iyo barnaamijka Ururka, go'aanada gudiya Ururka heer kastaba.
4. Go'aankaas lagu eryaayo waxaa soo jeedinaya guddiga Anshaxa Ee Golaha Dhexe, iyaga oo soo raacinaya warbixin arrintiisa la xidhiidha, kadibna usoo gudbinaya Golaha Dhexe Si ay go'aan uga gaadhaan si waafaqsan axdiga iyo Xeer Hoosaadka Ururka.
5. Haddii Qofku Gudan Waayo Xilkiisa Isagoo Caafimaad Qaba Soona Xaadiiri waayo Shirarka Ururka Muddo Kusiman Bil Xidhiidh Ah, Haduusan Ku Maqnayn Fasax Rasmi ah, ama Shaqo Ururku U diray.
6. Xubnaha loo doorto golayaasha sharciga ah lagama saari karo Ururka Haddii aysan Jabin Axdiga iyo Xeerarka Ururka U Yaal. iyaguna kuma biiri karaan Urur Kale inta ka horaysa doorashada soo socota iyadoo la raacayo xeer Hoosaadka
7. Uu jabsho shardi ka mid ah shuruudihii Xubinnimadda;
8. Uu ku dhaco xukun cigaabeed kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday;